



(Hadaad ku tiraado saaxiibka: aammus, maalinta jumcada, iyadoo imaamku khudbaynaayo, laqwi baad la timid)

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade wuxuu ka wariyey Rasuulka Ilaahay scw inuu yiri:
(Hadaad ku tiraado saaxiibka: aammus, maalinta jumcada, iyadoo imaamku
khudbaynaayo, laqwi baad la timid).
[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu scw wuxuu cadeeyey inay ka mid tahay aadaabta waajibka ku ah dadka salaadda jumcada u yimid: inay dhagaystaan khadiibka dhagaystaan, si loogu tadaburo waanada iyo wacdiga, qofka hadla wax yarba ha ahaatee isagoo imaamkuna khudbaynaayo, ee ku dhaha cid kale: (aamus ama dhagayso) midkaasi wuxuu waayey fadligii salaada jumcada.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3107>

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

